# Wargeyska Provider Hub | Oktoobar 2025

**Fariintan waxaa loo soo diray dhammaan dadka iska diiwaangeliyey Wargeyska Provider Hub-ka.** Haddii qof kuu soo gudbiyey iimaylkan, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad si toos ah isu qorto.

---

Ku soo dhawoow Wargeyska Provider Hub, oo ay daabacdo kooxda Provider Hub ee Gobolka Minnesota! Aad baan ugu faraxsanahay inaad nala socoto.

Qaybtan wargeyska waxaad ka heli doontaa:


- Xarumaha Daryeelka Carruurta ee Shatiga leh: Xusuusin ku saabsan Bixinta Lacagta Cusboonaysiinta Shatiga 2026
- Isticmaalayaasha Hadda ee Provider Hub: Noo sheeg sida Provider Hub uu kuugu shaqayso
- Dadka Raadinaya Daryeel Carruur: Lagu Casuumay Ka Qaybgalka Cilmi-baarista Naqshadda
- Daryeel-bixiyeyaasha Qoysaska ee Shatiga Haysta ee Minnesota: Diiwaangelinta CCAP oo Hadda laga heli karo Provider Hub
- Khadka Macluumaadka Provider Hub oo la Cusboonaysiiyey
- Talooyin ku saabsan Provider Hub: Ilaali Xogtaada Akawnka
- Talooyin ka socda Kooxda Product Success
- Isdiiwaangeli Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub ee Nofeembar
- Dhacdooyinka Bulshada ee Soo Socda
- Soo-saarradii Ugu Dambeysay
- Ilo Cusub iyo Kuwo la Cusboonaysiiyey




*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*

*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Xarumaha Daryeelka Carruurta ee Shatiga leh: Xusuusin ku saabsan Bixinta Lacagta Cusboonaysiinta Shatiga 2026 ee Provider Hub

Xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh ee qorsheynaya inay sii shaqeeyaan sanadka 2026 waa inay bixiyaan lacagta cusboonaysiinta shatiga ee Provider Hub ugu dambayn Oktoobar 30.

Laga bilaabo Talaadadii, Sebtembar 30, biilasha lacagta cusboonaysiinta 2026 ayaa laga soo saaray Provider Hub dhammaan barnaamijyada xarumaha daryeelka carruurta ee leh shati firfircoon ama sugaya dib-u-furitaan. Waa in lacag la bixiyaa shatiga ganacsi kasta oo leh biil 2026 ah. **Lacagaha cusboonaysiinta shatiga lama soo celinayo.**

### Macluumaad dheeraad ah

- Eeg Bixi Ganaax ama Lacag (Pay a Fine or Fee) si aad u hesho tilmaamo tallaabo-tallaabo ah.
- Dib u eeg iimaylkii Oct. 3 — kaas oo loo diray Wakiillada Sharciga ah ee barnaamijyada xarumaha daryeelka carruurta ee leh shati firfircoon ama sugaya dib-u-furitaan — si aad u hesho faahfaahinta.

Kor ugu noqo

## Isticmaalayaasha Hadda ee Provider Hub: Noo sheeg sida aaladda onlaynka ahi kuu shaqayso

**Bixiyeyaasha hadda adeegsanaya Provider Hub** waxaa lagu casuumayaa inay buuxiyaan Provider Hub Quarterly Usability Survey:

- La wadaag sida aaladda onlaynka ahi kuu shaqayso
- Ku buuxi 5–10 daqiiqo afka aad doorbidayso — English (Ingiriis), español (Isbaanish), Soomaali (Somali), iyo Hmong (Hmoob)
- Jawaabaha waa qarsoodi — magacaaga iyo ciwaanka iimaylka lama xiriirinayo

Haddii aad rabto inaad si toos ah ula wadaagto jawaab-celintaada kooxda Provider Hub, iimayl u dir: providerhub@state.mn.us.



*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Ku saabsan sahanka

Sahankan waxa aan la wadaagnaa isticmaalayaasha hadda jira ee Provider Hub qiyaastii afar jeer sanadkii. Natiijooyinku waxay naga caawiyaan inaan sii horumarino Provider Hub.

## Natiijooyinkii hore

Waad ku mahadsan tihiin dhammaan dadka buuxiyey sahankii gu'gii hore. Natiijooyinku waxay muujiyeen in isticmaalayaasha ku qanacsan yihiin muuqaalka guud ee Provider Hub, laakiin ay adag tahay fahamka habka loogu dhex socdo.

Wareeggan cusub, waxaan rabnaa inaan wax badan ka ogaanno sida loo hagaajin karo hagidda (navigation) iyo joogtaynta isticmaalka aaladda onlaynka ah.

Kor ugu noqo

# Dadka Raadinaya Daryeel Carruur: Lagu Casuumay Ka Qaybgalka Cilmi-baarista Naqshadda

Qayb ka mid ah Hindisaha Isbeddelka Nidaamyada*, Licensing Information Lookup (LIL) waxaa lagu sameynayaa naqshad cusub. LIL waa aalad onlayn ah oo muujisa macluumaad dadweyne oo ku saabsan barnaamijyada uu shati siiyo Gobolka Minnesota, oo ay ku jiraan xarumaha daryeelka carruurta.

Waxaan rabnaa inaan la shaqeyno dadka isticmaali kara aaladdan si aan u wanaajino.

## Faahfaahinta cilmi-baarista

- **Waa kee:** Dadka hadda raadinaya daryeel carruur — gaar ahaan kuwa afkoodu aanu ahayn Ingiriisi ama ku nool meel ka baxsan magaalada Twin Cities
- **Goorta iyo halka:** Kalfadhi onlayn ah oo hal mar ah, 20–30 daqiiqo; taariikho iyo waqtiyo kala duwan ayaa la heli karaa
- **Maxaa la filayaa:** Ka qaybgalayaasha waxay la kulmi doonaan 1–2 xubnood oo ka tirsan kooxda naqshadeynta ee Gobolka Minnesota. Waxqabadka waxaa ka mid noqon kara kala-soocidda



*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

ereyo, isbarbardhig naqshado, iyo ka jawaabista su'aalo. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad la wadaagto shaashaddaada inta lagu jiro kalfadhiga onlaynka ah.

- **Magdhow:** Ka qaybgalayaasha waxay heli doonaan kaar hadiyadeed (gift card).
- **Haddii aad xiisaynayso**: Iimayl u dir providerhub@state.mn.us. Waxaan markaas ku siin doonaa faahfaahin dheeraad ah oo jadwalka kula dejin doonaa haddii aad ku habboon tahay. Sidoo kale, waxaan ku weydiin doonaa baahiyahaaga marin u helidda (tusaale ahaan, turjubaan haddii loo baahdo).

### Codsi loogu talagalay bixiyeyaasha

Fadlan fursadan la wadaag qoysaska barnaamijkaaga iyo dadka kale ee shabakaddaada ku jira ee laga yaabo inay raadinayaan daryeel carruur.

**Ma xiiseyneysaa inaad ka qaybqaadato cilmi-baaristan adiga oo ah bixiye?** Iimayl u dir providerhub@state.mn.us si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.

### Asalka

*Provider Hub sidoo kale waa qayb ka mid ah Systems Transformation initiative. Hindisahan wuxuu adeegsadaa tignoolajiyada si uu u abuuro waayo-aragnimooyin hufan, fudud, iyo caddaalad ah oo loogu talagalay qoysaska, bixiyeyaasha adeegyada bulshada, iyo shaqaalaha dawladda.

Kor ugu noqo

## Daryeel-bixiyeyaasha Qoysaska ee Shatiga Haysta ee Minnesota: Diiwaangelinta CCAP oo Hadda laga heli karo Provider Hub

**Daryeel-bixiyeyaasha qoysaska ee shatiga haysta ee Minnesota** waxay hadda adeegsan karaan Provider Hub si ay u maareeyaan macluumaadka diiwaangelintooda Child Care Assistance Program (CCAP) (Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta).

Maareynta diiwaangelinta CCAP — iyo codsashada shatiga xarunta daryeelka carruurta — waa tallaabooyinka keliya ee daryeel-bixiyeyaasha qoysaska ay hadda ku samayn karaan Provider Hub. Weli



*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

kama maamulaan shatiga daryeelka qoyska ama macluumaadka Great Start Compensation Support Payment Program gudaha Provider Hub.

Daryeel-bixiyeyaasha qoysaska ha abuuran akoon Provider Hub iyagoo kaligood ah. Haddii aad rabto inaad isdiiwaangeliso CCAP markii ugu horraysa, ama ka dib muddo aadan ku jirin diiwaangelinta, iimayl u dir ccap.providers.dcyf@state.mn.us si aad u codsato gelitaanka akoonkooda Provider Hub.

Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa CCAP September newsletter (wargeyska CCAP ee Sebtembar) iyo bogga Recent changes to CCAP provider registration process (Isbeddelladii ugu dambeeyey ee nidaamka diiwaangelinta bixiyeyaasha CCAP).

Kor ugu noqo

## Khadka Macluumaadka Provider Hub oo la Cusboonaysiiyey

Macluumaadka ku jira Khadka duuban ee Provider Hub waa la cusboonaysiiyey. Wac **612-504-1298** (taleefon bilaash ah) si aad u maqasho macluumaad ku saabsan aaladda onlaynka ah.

Macluumaadka la duubay waxa uu inta badan loogu talagalay **daryeel-bixiyeyaasha carruurta ee qoysaska**. Waxa uu ka kooban yahay wararkii ugu dambeeyay ee ku saabsan bilaabista shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska gudaha aaladda onlaynka ah iyo sida loogu diyaargaroobo tignoolajiyada cusub.

Hadda, macluumaadka cusub waxa uu diyaar ku yahay oo keliya luqadda Ingiriisiga. Noocyada español (Isbaanish), af Soomaali (Somali) iyo lus Hmoob (Hmong) ayaa lagu cusboonaysiinayaa.

Khadka Macluumaadka Provider Hub waxa uu bixiyaa macluumaad duuban oo keliya; ma ku xidhayo dadka wacaya shaqaalaha. Waa ilo fiican oo loogu talagalay dadka doorbida inay dhagaystaan halkii ay ka akhrin lahaayeen macluumaadka.

Kor ugu noqo

## Talooyin ku saabsan Provider Hub: Ilaali Xogtaada Akawnka

Ilaalinta xogtaada gudaha Provider Hub waa mid muhiim ah. Hal dariiqo oo aad ku ilaalin karto waa inaadan cid kale la wadaagin macluumaadkaaga akawnka.



*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Waa maxay wadaagista akawnka

Wadaagista akawnka waa marka qof kale uu isticmaalo magaca isticmaalaha (username) iyo erayga sirta ah (password) ee qof kale si uu ugu galo nidaam, bog ama akawn — sida Provider Hub. Tusaalooyin:

- Agaasimaha xarunta daryeelka carruurta ayaa shaqaalaha kale u isticmaala magaca iyo erayga sirta ah ee akawnkeeda Provider Hub inta ay fasax ku maqan tahay.
- Shaqaalaha xarunta daryeelka carruurta ayaa wada isticmaala kombiyuutar shaqo. Haddii saaxiibkaa aanu ka bixin akawnkiisa Provider Hub, adiguna aad hawlo ku qabato akawnkiisa.
- Daryeel-bixiye carruurta qoyska ah ayaa u oggolaada xubin qoyska ah inuu ku maamulo dhammaan arrimaha Provider Hub isagoo isticmaalaya magaca iyo erayga sirta ah ee bixiyaha.

## Sababta aan akawnka loo wadaagin

Wadaagista akawnka waxay khatar gelisaa xogtaada gaarka ah waxayna yareysaa ammaanka Provider Hub. Wadaagista magaca isticmaalaha iyo erayga sirta ah ee Provider Hub waa mamnuuc (taas oo jebinaysa Shuruudaha iyo Xeerarka).

## Sida looga fogaado

Raac tallaabooyinkan si aad uga fogaato wadaagista akawnkaaga Provider Hub:

- **Kaliya** isticmaal magacaaga iyo erayga sirta ah markaad gasho Provider Hub.
- Hubi in dadka saxda ah ay helaan gelitaanka saxda ah ee Provider Hub. Waxaa jira heerar gelitaan oo kala duwan oo go’aamiya waxa qofku samayn karo. Adeegso hagayaasha gelitaanka isticmaalaha Provider Hub si aad u ogaato heerka saxda ah ee shaqaalahaaga iyo sida loo siiyo gelitaanka.
- Haddii shaqsiga rasmiga ah ee shatiga u qaabilsan barnaamijkaaga uu isbeddelo ama tago (sida Wakiilka La Oggolyahay ama Maareeyaha Xarunta), la xiriir shaqsiga kaa shatiya si loo cusboonaysiiyo macluumaadka qofka cusub.

Kor ugu noqo



*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Talooyin ka socda Kooxda Product Success

Kooxda **Product Success** waa koox khubaro maxalli ah oo kuu fududaynaysa inaad guul ka gaarto isticmaalka Provider Hub.

### Sida loola xiriiro kooxda

Wac 651-431-6075 ama [gudbi codsi taageero] markaad ku jirto Provider Hub. Waxaan ka jawaabnaa codsiyada Isniin ilaa Jimce inta u dhaxaysa 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo.

### Markakad soo wacdo, fariin reeb

Fadlan fariin u reeb. Fariintaada ku dar intii macluumaad ee suuragal ah:

- Magacaaga
- Magaca barnaamijkaaga
- Nambarkaaga taleefon
- Su'aalahaaga ama codsigaaga
- Nambarka shatiga ganacsiga (haddii la heli karo/khuseeyo)

Ma helno macluumaad dadka aan fariin ka tagin. Sidaas darteed, xog kasta oo aad reebto waxay naga caawisaa inaan si hufan oo degdeg ah dib kuu soo wacno.

Hadday noqoto fariin ama codsi onlayn ah, waxaan ku dadaaleynaa inaan ka jawaabno 24 saacadood gudahood — inkasta oo ay taasi ku xirnaan karto tirada codsiyada aan helno.

Kor ugu noqo

## Isdiiwaangeli Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub ee Nofeembar

Kooxda Provider Hub waxay qaban doontaa kalfadhiga macluumaad ee dadweynaha ee xiga Talaadada, Noofembar 18, laga bilaabo 6da fiidnimo ilaa 7da fiidnimo.

Qof kasta oo xiisaynaya inuu wax badan ka ogaado Provider Hub waa la soo dhawaynayaa. Mawduucyada waxaa ka mid noqon kara horumarada dhowaan lagu sameeyey Provider Hub, talooyin



*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

ku saabsan isticmaalka aaladda onlaynka ah, iyo ilo cusub ama kuwa la cusboonaysiiyey. Ka qaybgalayaasha waxaa loo oggolaanayaa inay su'aalo soo gudbiyaan intii lagu jiro kalfadhiga.

**Fadlan hore isu diiwaangeli.** Haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah (tusaale ahaan, turjubaan), fadlan isdiiwaangeli laba toddobaad ka hor dhacdada.

**Ma aadan awoodin inaad ka qayb gasho kalfadhigii Sebtembar?** Daawo Duubistii Provider Hub Information Session ee la qabtay Sebtembar 9, iyo sidoo kale qoraalka (PDF).

Kor ugu noqo

## Dhacdooyinka Bulshada ee Soo Socda

Kooxda Provider Hub waxay ku faraxsan tahay inay ka qaybqaadato Shaping the Future Family Child Care Conference ee Oktoobar 17 iyo 18 ka dhici doona Waite Park, MN. Waxaan soo bandhigi doonaa warbixin galabnimadii Jimce, sidoo kale waxaan yeelan doonaa miis Provider Hub ah labada maalmood ee shirarka.

Haddii aad timaaddo, nagu soo salaam! Aad baan u jeclaan lahayn inaan kula kulanno.

Kor ugu noqo

## Soo-saaridii Ugu Dambeysay

Waxaan sameynay horumar ku saabsan Provider Hub Ogosto 20 iyo Sebtembar 24. Cusboonaysiinta waxaa ka mid ahaa:

- Waxaa la xaliyey arrin la xiriirtay fayl gelinta **xarumaha shahaadaysan ee daryeelka** carruurta marka ay codsanayaan isbeddel goobta barnaamijka. Faylasha hadda si guul leh ayaa loogu gudbiyaa shaqaalaha shatiga
- Waxaa lagu daray PDF qeexaya macluumaadka la gudbiyey marka la dirayo ama la beddelayo xogta canshuurta ee CCAP
- Waxaa laga saaray awoodda bixiyeyaasha inay cusboonaysiiyaan aagga square footage marka la tafatirayo qolal hore loo oggolaaday — waxaa lagu geli karaa oo keliya marka la samaynayo codsi cusub ama lagu darayo qol cusub



*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

Ka eeg warbixinnada Ogosto iyo Qoraalkii bisha Sebtember la bixiyay si aad u aragto faahfaahinta cusboonaysiintan iyo kuwo kale.

Kor ugu noqo

## Ilooyin Cusub iyo Kuwa la Cusboonaysiiyey

**Xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh iyo kuwa shahaadaysan** waxay hadda heli karaan ilo cusub oo la xiriira ogeysiin waxqabad (Notice of Action) oo ku qoran afafka Ingiriisi, Español (Isbaanish), af Soomaali iyo lus Hmoob (Hmong).

Ka raadi ilooyinkan iyo kuwo kale qaybta Help & Resources markaad gasho Provider Hub.

### Soomaali

- Guudmarka Ogeysiiska Ficilka (Notice of Action)
- Eeg Ogeysiiska Ficilka (Notice of Action)
- Ka Jawaab Ogeysiiska Ficilka (Notice of Action)
- Codso Rafcaan ama Dib-u-eegis ku saabsan Ogeysiiska Ficilka (Notice of Action)




### Ingiriisi

- Notice of Action Overview
- View a Notice of Action
- Respond to a Notice of Action
- Request Appeal or Reconsideration of a Notice of Action

Noocyada Ingiriisiga sidoo kale waxaa laga heli karaa maktabadda waxbarasho ee shatiga/shahaadada:

- Licensed Child Care Centers | Licensing Learning Library



*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

- Certified Child Care Centers | Certification Learning Library

Kor ugu noqo

## Ku Saabsan Provider Hub

Provider Hub waa aalad onlayn ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha adeegyada bulshada si ay ugu codsadaan oo ay ugu maamulaan shatiyada, maalgelinta iyo barnaamijyada kale ee dawladda.

Waxaan sii wadeynaa horumarinta aaladda onlaynka ah iyo dhisidda astaamo cusub. Markaan taas sameyno, bixiyeyaasha badan ayaa heli doona gelitaanka. Ka eeg bogga Provider Hub faahfaahinta helitaanka hadda.

### Bixi Jawaab-celin

Baahiyaha iyo waayo-aragnimada bixiyeyaashu waa muhiim si loo horumariyo Provider Hub.

Iimayl u dir providerhub@state.mn.us si aad ula wadaagto faallooyinkaaga kooxda Provider Hub ama isdiiwaangeli si aad uga qaybqaadato fursadaha jawaab-celinta, sida buuxinta sahamin ama tijaabinta astaamo cusub.

Kor ugu noqo

## Ku Saabsan Wargeyska Provider Hub

Wargeyskani waxa uu la wadaagaa macluumaad guud oo ku saabsan Provider Hub dadka hadda isticmaala iyo kuwa mustaqbalka isticmaali doona aaladda onlaynka ah, iyo sidoo kale cid kasta oo danaynaysa. Waxaan soo dirnaa wargeys cusub oo Provider Hub ah qiyaastii labadii biloodba mar. Ka hel qaybihii hore bogga Provider Hub.

Ma nihin inaan wargeyskan ku beddelno macluumaadka si toos ah loogu diro kooxo gaar ah — sida digniinaha loogu diro dadka hadda isticmaala Provider Hub ama xogta lagu soo dhaweeyo dadka mustaqbalka isticmaali doona. Kuwan waan sii diraynaa gooni.



*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Hel wargeyskan afafka español, af Soomaali iyo lus Hmoob

Kooxda Provider Hub waxay daabacdaa wargeys kasta afar luqadood: Ingiriisi, español (Isbaanish), af Soomaali iyo lus Hmoob (Hmong).

Nooca Ingiriisiga ah ayaan marka hore ku soo dirnaa iimayl. Marka noocyada kale diyaar noqdaan, waxaan ku dhejinaynaa bogga Provider Hub. Marka noocyada español, Af Soomaali iyo Lus Hmoob ay diyaar noqdaan, dhammaan waxaannu si wadajir ah ugu soo dirnaa iimayl dadka isdiiwaangeliyey wargeyska.

## Lawadaag wargeyskan dadka kale

Ma taqaan cid kale oo laga yaabo inay xiisaynayso helitaanka wayarka ku saabsan Provider Hub? U sii iimaylkan oo ku dhiirigeli inay si toos ah isugu qoraan wargeyska.

Kor ugu noqo



*Updated 10/21/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*